



Xafiiska Wasiirka

Tixraac: SSC/WM/XW/XN008/2024

Taariikh: Abriil 1, 2025

XEER-NIDAAMIYAHA AJUUROOYINKA ADEEGGA WAXBARASHADA,

Isagoo fulinaaya mid ka mid ah ujeeddooyinka lagu sheegay Qodobka 2(4) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee la xiriira dabagalka dakhliga;

Isagoo u hoggaansamaya mabda'a lagu sheegay Qodobka 3 (7) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud oo tilmaamaya in dhammaan dakhliga ka soo baxa ilaha lacagta caddaanka ah ee Dawladda iyo hay'adaheeda lagu shubo halka xisaab ee "Khasnadda Mideysan", laguna ilaaliyaa lacagtaas iyada oo la raacayo maareyn hufan oo waxku'ool ah;

Markuu arkay Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023, iyo Xeerka Tacrifadda Cashuuraha Berriga;

Isagoo gudanaya awoodaha lagu siiyey Qodobka 88(1) ee Xeerka Cashuuraha Berriga, Xeer Lr. 2/2023, ee tilmaamaya inuu soo saarayo Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqangeliyo sharciyada dakhliga;

Wasiirka Maaliyaddu wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyahaan:

Qodobka 1aad

Jaangoynta Ajuurooyinka Adeegga Waxbarashada

1. Ajuurooyinka iyo khidmadaha lagu sheegay jaantusyada hoose ayaa noqon doona kuwa la dabaqayo marka uu dhaqan galo Xeer-nidaamiyahaan:

1.1 Ajuurooyinka Shatiga Goobaha Waxbarashada

Madax/Xige	Shaxda 7.1 Ajuurooyinka Goobaha Waxbarasho	Diiwaangelin	Cusbooneysiin
	Ruqshada Dugsi Quraan, Xannaano	\$100	\$100
	Ruqshada Dugsi Hoose/Dhexe -A (3-4 farac)	\$400	\$300
	Ruqshada Dugsi Hoose/Dhexe -B (2 farac)	\$300	\$200
	Ruqshada Dugsi Hoose/Dhexe -C (1 farac)	\$200	\$150
	Ruqshada Dugsi Sare	\$400	\$300
	Ruqshada Kuleej Waxbaraho (Hoy iyo Jiif)	\$500	\$350
	Ruqshada Kuleej Waxbaraho Heer Dibloomo	\$400	\$300
	Ruqshada Xarun Dugsi Farsamo Gacan	\$100	\$100
	Ruqshada Dugsi Tababar	\$600	\$400
	Ruqshada Jaaamacadda (Darajada 1aad)	\$1,000	\$500
	Ruqshada Jaaamacadda (Darajada 2aad)	\$200	\$150
	Ruqshada Jaaamacadda (Darajada 3aad)	\$2,000	\$1,000

1.2 Ajuurooyinka Shatiga Barayaasha (Shatiga Labo Sano)

Madax/Xige	Shaxda 7.2 Ajuurooyinka Shatiga Barayaasha	Diiwaangelin	Cusbooneysiin
	Ruqshada Baraha Dugsi Quraan, Xannaano	\$50	\$50
	Ruqshada Baraha Dugsi Hoose/Dhexe	\$50	\$50
	Ruqshada Baraha Dugsi Sare	\$70	\$70
	Ruqshada Baraha Kuleej Waxbaraho (Hoy iyo Jiif)	\$50	\$50
	Ruqshada Xarun Dugsi Farsamo Gacan	\$50	\$50
	Ruqshada Baraha Kuleej Waxbaraho Heer Dibloomo	\$50	\$50
	Ruqshada Baraha Dugsi Tababar	\$50	\$50
	Ruqshada Baraha Jaaamacadda (Darajada 1aad)	\$70	\$70
	Ruqshada Baraha Jaaamacadda (Darajada 2aad)	\$100	\$100
	Ruqshada Baraha Jaaamacadda (Darajada 3aad)	\$150	\$150

Qodobka 2aad

Bixinta iyo Ururinta Ajuurooyinka iyo Khidmaddaha

1. Ajuuradda iyo khidmadda waxaa ururinaya shaqaalaha/saraakiisha Wasaaradda Maaliyadda ee loo idmay ee ku sugan Wasaaradda Waxbarashada iyo Xarumaha Cashuuraha Berriga.
2. Dhammaan shaqsiyaadka bixinaya ujuurooyinka iyo khidmaddaha waxaa la farayaa in ay ku shubaan lacagahaas akoonada Wasaaradda Maaliyaddu u cayintey dakhliga ajuurooyinka Wasaaradda Waxbarashada.

Qodobka 3aad

Warbixinta Korjoogtenta Dhaqangalka Xeer-nidaamiyaha

1. Waaxda Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda waa inay korjoogteysaa u hoggaansanaanta Xeer-nidaamiyahaan, oo ay soo saartaa warbixin joogto ah oo ay la wadaageeyso Wasiirka Maaliyadda.

Qodobka 4aad

Dhaqangelinta Xeer-nidaamiyahaan

1. Xeer-nidaamiyaha Ajuurada Adeegga Wasaaradda Waxbarashada waxa uu dhaqangelayaa taariikhda uu saxiixo Wasiirka Maaliyadda.
2. Nuqullada Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu faafinaya mareegta (website) Wasaaradda Maaliyadda iyo midka Wasaaradda Waxbarashada.

Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiiraan

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Xarumaha Cashuuraha Berriga SSC Khaatumo

Saxeex: 

